# XIISA-GELI HADLKA



peuters&kleuters@2008

# 1. Xiisa-Geli hadalka

**• In caruurta hadlista la baro iyada oo afka la maqashiinayo hana kaana daba yiraado**
**• In caruurta hadlista la baro iyada oo loogu celcelinaayo.**
**• In caruurta hadlista la baro inta hawlmaalmeedka lagu mashquulsan yahay.**
**• In caruurta hadlista laga baro dadka ku hareereeysan.**
**• caruurta waxa ay ka helaan ayeey wax badan ka bartaan; ku farxista ayaa horreysa!**

**Inaga oo *XIISA-GELI HADALKA* adeegsaneyna waxaan dooneynaa in aan xogaa caawinaad ah ku fidino.**

Adeeggani waxa uu ka soo baxay hawlgalka ee taxanaha "Intercollegiale Toetsing Logopedisten", guddiga tayada caruurta yar-yar: Nathasja Barmes, Jeanne Beekman, Mariska Cornelissen, Claire Jansen, Petra Kratsborn, Mariska Kuper, Anja Leerink, Mieke Michels, Bouwina Scheringa, Erna Steeg, Roos Tangelder, Evelyn Verver, Carolien Veldman, Mara Weenink.
Dadka soo socda ayaa kala shaqeeyay: Gertie Savelkoul (begeleiding Traject Intercollegiale Toetsing), Jill Laurant (illustraties), Jeroen Breen (lay-out).

# 2. Habkee ilmaheyga ula socdaa?

• **Eeg** ilmahaada.
Sidee ilmahaada wax u eegaa? Tilmamehee ilamahaada sameeyaa? Muxuu ilmahaada yiraadaa? Muxuu ilmahaada ula jedaa?

• **Sug** oo sii ilmahaada wakhtiga uu wax ku sheegi kari lahaa.
Sidaa ilmahaada wuxuu ku helayaa fursad uu ku caddeyo waxa ay ujeedadu tahay.

• **Dhageeyso** oo dhug sii haddii ilmahaaga isku deyayo in uu wax kuugu yiraado.

• **Dhug u yeelo**.
Sidaa waxaad ku dhiiri gelineysaa ilmahaada in uu isku deyo in uu ujeedadiisa cabbiro, marka uu doonaayo in uu wax sheego.



**Maxaad sameyn kartaa?**

1. **Eeg halka ilmahaada eegaayo. Eeg sida uu ilmahaaga wax u eegaayo; si farxad leh, si murugo leh? Wax ka sheeg waxa ilmahaada arkaayo.**
2. **Eeg calamaadaha jirka iyo tilmaamaha ilmahaada.**
3. **Waa dhici kartaa in la kala aamuso; ma aha in aamusnaan kasta aad hadal ku dhameeystirto. Waa fursad uu ilmahaada wax ku sheego iyo fursad aad ku eegto ilmaaha.**
4. **Si dhug leh u dhageeyso ilmahaada. Waa ay kalsooni gelineysaa waxayna ka yeeleysaa in uu wax kale ka sheekeeyo.**

# 3. Habkee ula qabsadaa?

Wax la sameey ilmahaada. Ilmahaada wax buu sheegaya ama sameynayaa; waxaad tusineysaa in aad dhageysaneyso waxaadna ku dhiiri gelineysaa in uu sii sheekeeyo. Ilmahaada sida u yeelo yeel, dhawaqiisa oo kale dheh, dhaqdhaqaaqiisa oo kale sameey waxaadna wadageysaa farxad markaa.
Hadal ka dhig waxa uu ilmahaada sameeyo: dheh wuxuu ilmahaada dhihi lahaa.



**Maxaad sameyn kartaa?**

1. **Lowyada laab oo dhulka fariiso, si aad ilmahaada ula dherer ekaato.**


2. **Dhowr inta uu ilmahaada kaalintiisa qaato. Sidee ilmahaada wax u eegaa? Muxuu eegayaa? Waa wakhtiyada aad wada qaadan kartaan. ("Wax ma maqashaa? Haa, gaariga aabe.")**

3. **Ilmahaada dhaqdhaqaaqa/tilmaamaha/dhawaqa/xarfaha ka daba samee. Waa in muhiimadaada muujisaa. Taasi ilmahaada waa ay dhiiri gelineysaa in uu hore u sii socdo. (Haddii ilmahaada gaari ku ciyaaraayo waxaad leedahay "Fuum-Fuuum!".)**

4. **Sii ilmahaada fursad uu wax ku sheego. Ku caawin weydiinta su'aalo gaagaaban oo uu fahmi karo. ("Maxaad dooneeysaa? Ma kubaaba ama buugga yar baad dooneeysaa?")**

# 4. Habkee afka ugu soo biiriyaa?

Marka aad ilmahaada wax la sameyneeyso oo aad ka sheekeyso waxa dhacayo, waxaad u soo bandhiogtay afka. Sidaa ilmahaada xarfo iyo macnahooda cusub ayuu ku baran karaa oo uu wakhti dambe isticmaali karo. Ka daba samee iyo hadal ilmahaada kuna soo biiri tilmaan, xaraf ama jumlad dheeraad ah.




**Maxaad sameyn kartaa?**

1. **Ka shekee inta hawlmaalmeedka la haayo, maxaad sameyneysaa, marka aad meyraneeyso: "timaha dhaqo, bogga dhaqo, foolka yar dhaqo".**
2. **Haddii ilmahaada wax ku tusiyo, tusaale agab lagu ciyaaro, ka shekee markaa: "kubbad gaduud ah, kubadda waa mid taraaxda(rogroganta)".**
3. **Marka ilmaha sameeyo wax aan la dooneyn, u sheeg waxa uu sameeyay iyo sababta ay u reeban tahay. U sheeg maxaa ka fiican in la sameeyo: "Jidka miyaad dhex socotay? Taasi waa reeban tahay; waa qatar! Waxaa soo mari kara gaari! Ku ciyaar gidaarka, taasi waa la oggol yahay". Waxaad sidaa ku siisay beddel.**
4. **Haddi ilmahaada cuno wax aan la maceyn oo uu yiraado: "Aqash", dheh markaa waxa ilmahaada dhihi lahaa : "Aqash, waa kula qaraar, soo maha?".**

# 5. Buug yar isla eega oo isla akhriya

Xitaa haddi aad wax isla akhrisaan, ilmaha afka ayeey ka baran karaan.
Ilmahaada ku celcelinta wuxuu ku baranayaa xarfo cusub; isla buugii yaraa mar kale u akhri.
Taasi dareenka afka ee ilmahaada ayeey dhiiri gelineysaa; ilmaha keli ma baranaayo xarfaha iyo jumladaha, ee wuxuu xitaa baranayaa laxanka iyo jaan go'ynta afka.



**Maxaad sameyn kartaa?**

1. **Sii muhiimad jaan go'ynta, celcelinta iyo xarfaha. Sheekada taasi xiiso ayeey ku yeelaneysaa.**


2. **Ku beddel magacyada buuga mar magaca ilmahaada, kan walaalkii, walaashii, saaxiibkiisa ama saaxibadiisa.**

3. **Isla eega ooi sla akhriya, xitaa haddii ilmahada weli wax akhrinin. Wuxuu dhameystiri karaa jumlado amaba halabuuri karaa. ("Jiirka yaraay oo dabci wanaagsaa waxa uu degganaay…..")**

4. **U daa in ilmaha ka sheekeeyo wax ka tilmaamo waxa taswiirta uu ka arko taana ka wada hadla.**

# 6. Wax wada jarjara dhejiya = wada hadla

Inta aad wada wax jarjareysaan dhejineysaan waxaad ilmahaada u sheegi kartaa waxa uu ku mashquulasan yahay. Sidaa waxa uu ilmaha ku baranayaa xarfaha la xiriira hawlgalkaas. Ilmahaada waa uu ku raxeysanayaa wada xiriirkaa iyo dhugta loo yeeshay, waklhti wacan oo wadahadal yar la sameeyo waxaadna ka wada heleysaan farxad labadiinaba!
Adiga oo xarfaha ilmahaada ku celceliya, waxaad ilmahaada bareysaa in kuwaada uu ku celceliyo.




**Maxaad sameyn kartaa?**

1. **Sawir wada sameeya. Ka hadal midabada iyo dhaqdhaqaaqa aad sameyneysaan. Dhawaqa xarfaha iyo ku celcelinta ilmahaada ka daba dheh.**

2. **Hadii aad sawir gacmeed aad gidaarka surto, qofwaliba waa uu eegi karaa oo wax ka sheegi karaa.**

3. **Buuga sawirka lagu xaffido isla sameeya. Habkaa wuxuu ku fududeynayaa in dhacdo hore aad dib isula eegtaan kana wada hadashaan.**

4. **Dhoobo wax ka wada sameeya. Inta aad sii dhameystiri lahayd waxa uu ilmaha sameyn doono amaba uu sameeyay waxaad su'aali kartaa iyadoo taa furan, tusaale ahaan: "Maxaa hadda sameeynaa?".**

# 7. Habkee u wada ciyaari kartaan?

Dubaba dhalashada kaddib ilmaha waa uu ka helaa in uu kula joogo. Adiga iyo ilmahaada waad ku raaxeysaneysaan wada xiriirka. Ilmaha waa ka helaan ciyaar-guriyeedka. Marka aad ka joojiso, ilmaha waxaa uu si cad kuugu muujinayaa in uu doonayo in la sii wado. La qabso calamaadadaa oo kale, sidaa ayuu ku dhashaa wada xiriirka! Hawlgalka u kaltama kana hadal waxa aad sameyneyso. Ku casum ilmahaada in uu kula sameeyo siina ilmahaada wakhtiga uu u baahan yahay.
U oggolow ilmahaada in uu kugu caawino hawlmaalmeedka. Ka yeel in ay ciyaarta ka mid tahay; ilmaha waa in ay ka helaan in ay caawinaad bixiyaan.



**Maxaad sameyn kartaa?**

1. **La ciyaar dhumaashada, ciyaar oo hees “Bood farskoow bood”, wada sameeya “Jan Huygen oo ku jiray fustada”.**

2. **ha kugu caawino ilmahaada diyaarinta miiska lagu cunteeyo (“Kani halkan dhig”), kala saarista dharka ladhaqay (“kii aabe, kii hooyo”), biyo siinta dhirta (“waa biyihii, waa biyihii…”) wada jir u xareeya adeega, adiga oo wax kasta magacaabaayo.**

3. **Kula ciyaar adeeg bixin oo ka yeel sidi adigoo wax cunaaya ama cabbaaya. Ku wada hadla telefoonka lagu ciyaaro. Ku wada ciyaara baakad oo ka yeel sida in ay dooni tahay. U oggoloow in ilmaha dhar kale xirto.**

# 8. Habkee muusik u wada sameyn kartaan?

Ilmaha in ay hessan ook u ciyaraan waa ay ka helaan.
Kolka aad wada heestaan oo dhaqdhaqaaqdaan waxa ilmahaada baranayaa in uu la socdo laxanka iyo jaan go'ynta.
Xarfo cusub ayuu baranayaa iyo tilmaamaha la socda.
Adiga la samee inta badan! (oo demi inta badan raadiyaha iyo TVga).




**Maxaad sameyn kartaa?**

1. **Waxaad maalinta oo dhan ku wada heesi kartaan marka la cadanaayo, gaariga la kaxeynaayo, baskiilka la wado, ka nadiifinta bambarka; adigaa ereyada u hal abuuraya.**

2. **Ereyada heesta waxa ay la xiriiraan hawsha aad ku jirtaan. Adeegso laxan la yaqaan: "Kow, laba, saddex, afar, funaadda gisho, surwaalka gisho, kow, laba, saddex, afar, dharkoo dhan waa gishtay".**

3. **Sacabtun oo soco marka aad heesto, dhaqdhaqaaq aad ka fekertay ku lamaani.**

4. **Kaltanka: adiga heesaya: "jaanyuurta mauw, halkan kaalay ……". Ilmahaada ayaa leh: "auw" (=gauw). Adiga heesaya: "Madax, garbaha, jilibka iyo suulka". Ilmahaad lugta ayuu qabtay. "Heer sare, mar kale!".**